

# XOG MUHIIM AH OO KU SAABSAN SAMAYSASHADA PIN-ka IYO ADEEGSIGA KAARKAAGA P-EBT

Adeegga Macaamiisha ee Ohio EBT ood ka helayso 1-866-386-3071 ***Sideen uga shaqeysiya kaarka?***

Wac lambarka taleefanka ee ku yaala dhabarka kaarka. Waxaad u baahan doontaa lambarka kaarka EBT ee ku yaala xagga hore ee kaarka, sib koodhkaaga, iyo taariikhda dhalashada ilmaha magaciisu ku qoran yahay kaarka. Waxaad u baahan doontaa inaad **galiso afarta god ee sannadka dhalashada ilmaha (tusaale, 1980)** oo u taagan 4 god ee ugu danbeeya Lambarka Sooshiyaal Sikiyuritiga ee ilmaha, marka meesha la galinaayo ay soo baxdo. Waxaad u baahan doontaa inaad sameysato lambar PIN ah oo afar god ah oo cusub si aad kaarkaaga u isticmaasho.

## ***Sidee ayaan u isticmaalaa kaarka?***

Markii laga shaqeysiyo, kaarka waxa loo isticmaali karaa in lagaga iibsado cuntooyinka loogu talagalay meel kasta oo kaararka SNAP/EBT aqbasha. Inkastoo kaarka magaca ilmuhu uu ku yaalo, haddana khasab ma aha inuu ilmuhu joogo marka kaarka la isticmaalayo. Waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho lambarka PIN-ka ee aad samaysatay markii aad ka shaqeysiinaysay kaarka iyo markii aad sameynayso iibsi kasta oo SNAP/EBT ah. Kaarka waxa lagu isticmaali karaa aaladda la dhex mariyo kaarka, sida kaarka bangiga (debit card) oo kale ama waxa loo dhiibi karaa khasnadjiga.

**Fadlan hayso kaarkaaga maadaama loo isticmaali karo dheefaha kale ee Pandemic EBT.**

**Wixii su'aalo dheeraad ah ee ku saabsan dheefaha PEBT, booqo <https://jfs.ohio.gov/ofam/p-ebt.stm>**

